Siyaasadda JK- Anshaxa Ardayga

I. Horudhac

A. Guddiga Waxbarashadu wuxuu taageeraa muhiimada Dugsiyada Dadweynaha Denver ("Degmada"), taasi oo ah in ay siiso dhammaan ardayda oo dhan fursad ay ku helaan aqoon iyo xirfado lagama maarmaan ah si ay u noqdaan muwaadiniin ka qaybqaata bulshadeena kala duwan. Ardayda waxaa khasab u ah in ay hellaan fursad ay ku hormariyaan xirfadahooda, aqoontooda, iyo awoodooda xirfadeed ee ku saaban barbaarinta iyo diyaarinta dugsiga ay ka masuul yihiin. Ardaydu waa in ay hellaan waxbarasho wax ku ool ah iyo ka qaybqaadasho, ay la jirto manhaj kala duwan, xagid, iyo weliba qiimeyn loogu talagalay in ay haqab tirto baahida dadka wax naga barta ee kala duwan. Ardaydu waxay xaq u leeyihiin in ay ka qaybgalaan dugsiyada ammaanka ah kana maran mushkiladaha aan loo baahnayn. Guddigu wuxuu aaminsanyahay in akhlaaqda ardeyga toosan, taas oo lagu xoojiyay barnaamij anshax oo wax ku ool ah, oo ah mid aasaasi u ah sameynta iyo ilaalinta jawi dugsi wanaagsan. Middaana waa mas'uuliyad ka dhaxeysa ardayda, shaqaallaha, waalidiinta, iyo bulshada.

II. Ujeeddada

A. Hadafka looga danleeyahay anshaxa ardayga waa in uu ardayda baro in ay u dhaqmaan qaabab ka qaybqaadanaysa gaarid waxbarasho iyo guul dugsiyadeed,iyo weliba in ay deegaanka dugsiga caawiso si halkaasi loogu helo arday iyo shaqaale mas'uuliyiin ah oo tixgelina leh.

B. Ujeeddada siyaasaddan waa in ay anshaxa dugsiga ku caawiso waxyaabahan soo socda:

i. Ilaalinta bulsho wax u barata qaab nidaamsan oo ammaan ah

ii. Balanqaadida isku xirnaanta dhammaan dugsiyada ku yaala degmada;

iii. Caddaynta iyo la xariirida filashooyinka ka imaan kara dabeecada iyo akhlaaqda ardayga;

iv. Caddaynta iyo la xariirida filashooyinka ka imaan kara mas'uuliyada shaqaalaha la xariirta anshaxa dugsiga;

v. Isku dheelitirida baahida ardayga, baahida kuwa sida tooska ah u saamaysa akhlaaqda, iyo weliba baahida guud ee beesha dugsiga ;

vi. Adkaynta cadaalad iyo sinaan u dhaxeysa dhammaan dadka ku kala duwan jinsiga, dhalashada, iyo dhaqanka, sidoo kale dhammaan dabaqooyinka kale ee la dhawro (qollada, midabka, asal ahaan meesha uu ka soo jeedo, nasabka qofka, diinta, da'da, naafonimada, dookha galmo, iyo garashada nooca qofka dhedig iyo lab).

III. Mabaadiida Guud

A. Anshaxa Dugsiga waxaa si fiican looga dhabaynaa marka laga hortago akhlaaq xumada inta aysan dhicin kahor, iyo adeegsashada soo dhex gelid waxtar leh kadib marka ay dhacdo.

B. Ammaanka Dugsiga iyo guusha waxbarashadu waxaa la qaabeyn karaa lana xoojin karaa marka dhammaan shaqaalaha dugsiga ay la yeeshaan xiriir wanaagsan ardayda kadibna si fir-fircoon uga qayb qaataan noloshooda iyo waxbarashadooda.

C. Anshaxa Dugsiga waxtarka lehi waxay badisaa qadarka waqti ee ay ardaydu ku qaataan waxbarashadu waxayna yareysaa qadarka wakhti ee ay ardaydu ku sababi lahaayeen mushkilad ama looga bixin lahaa fasalkooda akhlaaq xumo darteed.

D. Anshaxa Dugsiga waa in ay noqotaa mid macquul ah, wakhti ku xiran, cadaalad ah, da'duna ay tahay mid munaasab ah, waana in ay buuxisaa oo ay dheeli tirtaa khatarta akhlaaq xumida ardayda. Anshaxa Dugsiga taas oo ay la socoto tilmaamooyin iyo hoggaan macna weyn leh waxay ardaydu u oggolaanaysaa fursad ay wax kaga bartaan khaladkooda kana qaybqaataan beesha dugsiga, waxayna midaasi u suurto gelinaysaa ardayga in uu dib-uga qaybqaato waxbarashada.

E. Anshaxa waxtarka lehi wuxuu ku saleysan yahay maareyn fasal oo isku dheeli tiran, waxayna caawinaysaa helitaan la helo jawi dugsi oo wanaagsan. Mawduucyada ugu badan ee ku saabsan anshaxa waa in lagu sheegaa heerka uu fasalku yahay ayna sheegaan macalimiinta; si kastaba, akhlaaqda qaar ee aan heerkaasi lagu sheegi karin waa in ay helaan abaarid badan iyo soo dhex galid xoogan, sida ay xaddideyso qiimaynta kalida ah.

F. Degmadu waxay u adeegtaa bulsho kala duwan. Si loogu adeego dhammaan ardayda oo dhan looguna diyaariyo in ay noqdaan xubin ka tirsan bulshada sii weynaanaysa, dugsiga iyo shaqaalahu waa in ay sameeyaan karti dhaqan. Waa in aynu u dadaalno sidii aynu u baabi'in la hayn wax kasta oo la xariira midab sooca weyn iyo midab takoorada kale ee horjoogsan kara guusha.

G. Dhaqanka ardayga taasi oo ay dhacayso in ay hoostimaado ficil anshaxa ah oo ay ku jirto kuwa dhaca inta lagu guda jiro hawlaha manhajka ama kuwa aan manhajka ahayn , ama kuwa ka dhaca fasalada gudahooda, dhismeyaasha dugsiga, dhulka dugsiga dushiisa, ama gawaarida dugsiga gudahooda, marka dhaqan kaas oo kale ah uu yahay mid deegaanka dugsiga dhib u keenaya iyo nolol wanaaga ama ammaanka ardayda kale ama shaqaalaha dugsiga.

IV. Hadal guud oo ku saabsan Siyaasadda

A. Nidaamka Degmada ee anshaxu waa mid ku dhisan mas’uuliyad shakhsiyadeed, taasi oo loo fahmayo in ay macnaheedu tahay:

i. Oggaanshaha in dhaqan xumaantu ay dhaawacayso xariiryada u dhaxeeya qofka ama dadka sida xun loola dhaqmey, qofka dhibka kasoo gaarey dhaqan kaasi, iyo bulshada guud ahaanteeda kale;

ii. Jiritaanka fursad lagu xagaajin karo dhibka la gaystay laguna soo celin karo xariiryadii dhaawaca gaaray marka kasta oo ay suurtowdo, ee aan ku jirin qofkii dhaqanka xun sameeyay;

iii. Dhisida mas'uuliyad shakhsiyadeed taasi oo lagu dhisayo caawinta qofkasta siduu u hormarin lahaa naxariis, xakamaynta-nafta, iyo boorrin.

B. Anshaxa Dugsiga ee soo dhexgalka waa in lagu hago mabaadiidan soo socota:

i. Samaynta aqoonsi hore iyo qiimaynta halganka ardayda inta aysan dhicin kahor;

ii. Adeegsiga hab socod xaliya mushkilada si ugu oggolaato soo dhexgalidda munaasabka ah ee baahida ardayga;

iii. Hubin ilaalin horusocod ah taasi oo waqti ku xiran iyo jawaab celis;

iv. Keenid cilmi, cilmi-baaris ku saleysan soo dhexgalada ay la jirto hufnaan.

C. Waxaa jira seddax nooc oo xeeladaha soo dhexgalka ah kuwaasi oo la helaayo: Hawlaha Maamulka laxariira, Nafaqo leh ama xoojiye, iyo mid ku dhisan-Xirfada/Daawayn. Macalimiinta iyo maareeyaasha waa in ay tixgeliyaan adeegsashada noocyo kala duwan oo xeelado ah, ama xeelado badan oo isla markii ah, si loola dhaqmo dhaqan xumada, gaar ahaan gefafka ama denbiyada 2aad ama 3aad.

D. Degmadu waxay samayn doontaa dadaal kasta oo macquul ah si loo saxo dhaqan xumada ardayga taasi oo ku saleysan xogag-dugsi oo ah heerka ugu hooseeya ee suurto galka ah, uguna caawiso ardayda barashada xirfadaha lagama maarmaanka ah si loo hormariyo deegaan dugsi oo wanaagsan loogana fogaado dhaqanka xun.

E. Shaqaalaha Degmadu waa in ay daa'imaan dhammaan qaanuunada dowladda iyo dowladda dhexe ee munaasabka ah iyo nidaayada magaalada, ay la jirto dhammaan qorsheyaasha guddiga ee arinta la xariirta iyo hawlaha la samaynayo marka lala dhaqmayo arrimaha anshaxa ku saabsan.

F. Arday kasta waxaa looga baahan yahay in uu raaco siyaasaddan iyo hawlaha kale ee la socda.

G. Dhammaan ardayda waxay leeyihiin heer sare oo akhlaaq ah, dadka waawayna waxay heerkaasi ku gaarayaan wax barid, qaabayn, iyo ilaalinta akhlaaqda, iyo weliba sixidda dhaqan xumada intiiba ay lagama maarmaar tahay midaasi. Ardaydu waa in ay ka qaybqaataan qawaaniinta anshaxa horumarinta ah ee ka dhacda dugsigooda iyo fasaladooda.

H. Dugsiyadu waa in ay yareeyaan isticmaalka xanibaadda-dibadda-dugsigaa ah, talooyinka eryinta ah, iyo u noqoshada fulinta qaanuunka, xadka ugu suurto galka ah samayntiisa halka ay ahaanayso mid ku dheeli tiran nidaamka aasaasiga ah ee dowladda, xeerarka gudaha, iyo warbixinta qawaaniinta khasabka ah. Waa hadafka Dugsiyada Dadweynaha Denver iyo Guddiga Waxbarashada taasi oo ah in nidaamyada cadaalada ee cusub iyo dambiga loo adeegsado in yar si looga hadlo dhaqan xumada dugsiga-ku saleysan.

I. Hawsha anshaxa waa in ay dammaana qaadaa hawl loogu fuliyo dhammaan ardayda si sinaan ah, cadaalad ah, isku si ah iyo qaab aan lahayn midab takoor ku saleysan qollada qofka, jinsi, midab, diint, asalka ahaan meesha uu ka soo jeedo, qowmiyadda, jinsiga dookha galmo, da'da, ama naafonimo.

J. Qorshahan iyo nidaam hawleedyada la socda waxaa loogu talagalay in ay ku caawiso Degmada baabi'inta midab takoorka iyo farqiyada jinsiyadaha u dhaxeeya, iyo farqiyada dabaqooyinka kale ee la dhawro u dhaxeeya, anshaxa dugsiga, marka la wanaajinayo akhlaaqda, jawiga dugsiga, iyo gaarida waxbarasho la siinayo dhammaan ardayda oo dhan.

K. Macluumaad aruursan dhamaystiran oo sax ah ayaa aasaas u ah maareynta qorshe anshaxa dugsiga oo waxtar leh. Waxay caawinaysaa garashada mushkiladaha, samaynta xalal, iyo ilaalinta ama ka warhaynta horumarka.

L. Sidaas daraadeed Guddiga waxbarashadu wuxuu aaminsanyahay khiddadaan iyo nidaam hawleedyada la socda/heerarka sida qorshaha ammaanka dugsiga ee Degmada sida lagu amray lambarkan C.R.S. 22-32-109.1. Dugsiyadu waxay xor u yihiin in ay samaystaan Lambaro sir ah oo ayaga u gaar ah taasi oo khuseysa dhaqanka intiiba ay qorshooyin kaasi kahor imaanayn khiddadan ama siyaasaddan, iyo heerarka la socda, ama siyaasado kale oo Guddigu iska leeyahay, lambaradan sirta ah waxaa laga aqbalay dhinaca maamulaha xagiisa ama qorsheeyaha.

M. Degmadu waxay siyaasaddan soo gelin doontaa bogga internetka ee Degmadu leedahay iyo weliba dugsi kasta. Nuqulka siyaasaddan iyo nidaam hawleedyada la socda waxaa laga heli doonaa dugsi kasta xafiiska laga maamulo, ayada oo ay ku qorantahay dhammaan luuqadaha Isbaanishka iyo Ingriiska. Nuqulada siyaasaddan, nidaam hawleedyadeeda la socda / heerarka, iyo qawaaniinta dugsiga ayaguna waa kuwo la heli doono, haddii la codsado, arday kasta iyo waalid kasta/ mas’uul kasta, haddii la codsado nuqulkan siyaasadda waxaa isla markiiba loo turjumayaa luuqad uu fahmi karo waalidka/ mas’uulka.

N. Maamulaha, ama qorsheeyaha, ayaa horumarin doona nidaam hawleedyadaasi oo kale intiiba looga baahdo fulinta siyaasaddan.

La ansixiyay 14 Janaayo, 1994
La muraajaceeyay 5 Sibteembar, 1996
La muraajaceeyay 18Juun, 2000
La muraajaceeyay 21 Juun, 2001
La muraajaceeyay 15 Nofeembar, 2001
La muraajaceeyay 18 Diseembar, 2003
La muraajaceeyay 21 Agoosto, 2008

TIX RAACA SHARCIGGA: C.R.S. 18-12-105.5
C.R.S. 18-18-102
C.R.S. 18-18-406
C.R.S. 18-18-407(2)
C.R.S. 22-32-102(1)(W)
C.R.S. 22-32-209

C.R.S. 22-32-110(2)(3)(4)
C.R.S. 22-32-126
C.R.S. 22-33-105
C.R.S. 22-32-106
C.R.S. 22-32-109.a(2)(a)X
20 USC 88921
C.R.S. 22-32-109.1 (qabatinka iyo fulinta qorshe dugsi oo ammaan ah ayna ku jirto dhaqanka iyo lambarka sirta anshaxa laga saaray fasalka)